

Ma rabtaa in aad ka dacwootid in aan lagu qaban turjumaan?

Fylkeslegen (Dhakhtarta gobolka) ee jooga kormeeridda caafimaadka ee gobolka aad degentahay (www.helsetilsynet.no)

Pasient- og brukerbudet (Xafiiska u dooda bukaanka iyo isticmaalayaasha) ee gobolka aad degentahay (www.pasientogbrukerbudet.no)

Sivilombudsmannen (Xafiiska looga dacwodo khaladaadka hab-maamulka dawladeed) tel: 22 82 85 00 lambar bilaash ah: (+47) 800 800 39

Likestillings- og diskrimineringsombudet (Xafiiska sinaanshaha iyo ka hortegida takoorka) tel: 24 05 59 50

Organisasjonen Mot Offentlig Diskriminering (Ururka la dagaalanka takoorka dawladeed, OMOD) tel: 22 20 87 37 (www.omod.no)

Miyey jiraan su'aalo ku saabsan xuquuqdaada?

Pasient- og brukerbudet (Xafiiska u dooda bukaanka iyo isticmaalayaasha) ee ku yaala gobolka aad degentahay (www.pasientogbrukerbudet.no)

Organisasjonen Mot Offentlig Diskriminering (Ururka la dagaalanka takoorka dawladeed, OMOD) tlf: 22 20 87 37, (www.omod.no)

Ma waxaad ka dacwooneysaa tayada iyo aqoonta turjumaanka?

Dacwadaa waxaad u diri kartaa xaruntaada caafimaad.

Sharciyadda ku saabsan xuquuqda bukaanka iyo waajibaadka saaran shaqaalaha caafimaadka

Lov om pasientrettigheter (Sharciyadda xuquuqda bukaanka)

Lov om helsepersonell (Sharciyadda shaqaalaha caafimaadka)

Qoraal-warbixineedka waxaad ku helaysaa in ka badan 20 luuqadood, waxaanad ka soo rogan kartaa:

www.nakmi.no

www.helsedirektoratet.no



Bukaanka iyo turjumaanka

Qoraal-warbixineed oo ku saabsan turjumidda adeegga caafimaadka

BUKAANKA IYO TURJUMIDDA

- Waa in warbixinta ku saabsan xaaladdaada caafimaad iyo daaweynta lagugu siiyaa luuqad aad fahmaysid
- Adeegga caafimaadka ayaa ka masuul ah, waajibna ku tahay in ay ballamiyaan turjumaan
- Adeega turjumaanku waa u bilaash qofkii bukaan ah
- Waxaad la hadli kartaa adeegga caafimaadka, waxaadna ka codsan kartaa in lagu ballamiyo turjumaan
- Waxaad xaq u leedahay in lagu qabto turjumaan, xataa hadii aad nolol maalmeedkaaga ku hadashid af-noorwiji. Tani si gaar ah waxay muhiim u tahay marka arrinta laga hadlayaa ay tahay cudurada khatarta ah ee joogtada ah, iyo marka wadahal ku saabsan xaaladda maskaxda la yeelanayo.
- Waxaa keli ah ee turjumaan loo isticmaali karaa, mid aqoontii turjumaanimo leh
- Maaha in ubadka loo isticmaalo turjumaanimo
- Shaqaalaha caafimaad waxaa ku waajib ah in ay taageerada caafimaad u bixiyaan si masuuliyadi ku jirto. Hadii aanad rabin turjumaan, waa in lagu siiyo warbixin ku saabsan in ay taasi kuu keeni karto cawaaqiib xunxun oo ku timaadda caafimaadkaaga.
- Telifoonka oo lagu turjumo waa wax lagu bedelen karo in turjumaanku goobta yimaado
- Hadii aanad ballan iman karahayn, waxaa muhiim ah in aad iska baajisid 24-saac ka hor. Haddaad imanweydo, kharashka dhakhtarka waa in aad bixisid.

SIDEE UGU WANAAGSAN EE AAD UGA FAA'IIDAYSAN KARTAA WADAHADAL TURJUMAAN JOOGO?

- Adeegga caafimaad ku wargeli luuqadda aad ku hadashid. Hadii dad badan oo qoyska ka mid ahi imanayaan, isticmaala turjumaan qoyska oo dhami wada fahmayaan.
- Ballanta wakhtigeeda ku kaalay
- Sii qorshee waxa aad doonaysid in aad kaga hadashid ballanta caafimaad
- Isticmaal weero gaagaaban, hadalkana soo kookoob. Taas ayaa turjumaanka u suurto gelinaysa in uu si saxsan u turjumo.

TURJUMAAANKU WAA KUMA, HAWSHIISUNA WAA TEE?

- Turjumaanka habbooni waa mid aqoon waxbarasho u leh xirfadda, lehna khibrad
- Turjumaanku waa in uu xeerarka turjumidda ku sheegaa labada afba marka uu wadahalalku bilaabmayo
- Turjumaanku maaha in uu qayb ka mid ah kuwa wadahaldaya garabka siiyo
- Turjumaanka waxaa saaran waajib sirqarin. Ciqaab ayaa lagu mutaysan karaa hadii la jabiyo waajibka sirqarin
- Turjumaanku waa in uu wada turjumo wax kasta oo la yidhaahdo, laakiin maaha in uu isagu talo bixiyo ama ku soo darsado fikirkiisa
- Turjumaanku waxa keli ah ee uu qabanayaa waa in uu turjumo, sidaa daraadeed maaha in uu howlo kale u qabto qofka bukaan ah ama shaqaalaha caafimaadka
- Maaha turjumaanka in howshiisa laga dhexgalo, ee waa in loo daayo si uu u turjumo waxa ay leeyihiin qaybaha wadahaldayaa
- Su'aalaha oo dhan waa in lagu hagaajiyoo shaqaalaha caafimaadka, maaha in su'aasha la weydiyo turjumaanka